



## **Bayaanka Farshaxaniistaha Emily Donovan oo *Masuuliyiinta Dhulka***

Beeraha bulshada waxaa buuxiyo aktarada dhulka oo gudaha Gobolka Ramsey. Beerahaan waa boosaska meesha dad badan isugu imaadaan, waqti ku isticmaalaan banaanka, beertaan cunto waarta oo u dabaal dagaan kala duwanaanshaha diigaankeena. Shaqadeyda farshaxanka, *Masuuliyiinta Dhulka*, waxay muujisaa dadaalada bulshooyinkaan iyada oo la isticmaalayo rinjiyada dabiiciga ah iyo midibka dabiiciga, isla rinjiga iyo midibka dabiiciga ee lagu isticmaalo dhaqanka matalo bulshooyinkeena.

Iyada oo la isticmaalayo midibada dabiicigeena waa dhaqanka caalamka laga wadaago. Si loo aburo shaqada farshaxankaan, waxaan ku balaariyay cilmi baaristeyda midibada dabiiciga iyo rinjiyada aniga oo diirada saarayo labadaba dadka dhaladka iyo bulshooyinka muhaajirka oo halkaan ku nool. Waxaan u arkay farxad joogteynta cilmi baaristaan. Illaha midibka oo ku badan baluugyada, jaalaha iyo gaduudka waxay leeyihiin hantiyo taariiqi ah oo ay wadaagaan dhaqamada oo dhan.

Waxaan raadiyay oo aan helay aqabyo lagu sameeyo midabo bandhigo dhaqamadaan caalamiga ah. Ku dul riinjiyeynta dhoor jeer, midabo kala duwan wuxuu ka imaadaa illo kala duwan. Fiiri h <https://www.rchs.com/news/chamber-art/> oo tusmada ay ku jiraan midibka lagu isticmaalay qeybtaan farshaxanka, iyo gobolada asalkooda. Midib walba waxaa laga sameeyay karkarinta dhirta ama waxyaabaha cayayaanka ee biyaha ku jiro si loo sameeyo wadaada riinjiga. Sida la midka ah riinjiga dharka, waxaan isticmaalay dabool kala duwan oo aan ku daboolo aagaga. Tani waxay u abuurtaa boos riinjiyada ku dhuuqmaan sidaa darteed u ogolaAnayo naqshadaha iyo sawirada.

Waxaa i dhiiriyay farshaxanimada muhaajaradeena iyo dadka dhaladka. Waxaa jiro midabeyn dharka sheekada Hmong, naqshadaha Cilaanka ee Bariga Afrika, iyo naqshadaha sawiro illaha cuntada dadka dhaladka sida bariiska beeraha. Jaantusyada waxay ka yihiin isku dar beeraha. Jaantusyadaan waxay muujineysaa howlo kala duwan sida beerista, u janjeerida beeraha, dalag gurashada iyo ku raaxeysiga boosaska.

*Masuuliyiinta Dhulka* waa goob magaalo ee sawirtaa beeraha iyo beerayaasha iyaga oo isu keenayo oo u janjeero dhulkooda. Booska mar banaanaa ee caasimadeena hadeer waxay qani ku yihiin cunto, midib iyo wadajirimo oo waa meel aan ku beeri karno wax qurxoon.

**For more information on the Ramsey County Courthouse/St. Paul City Hall  
Council Chamber Art Project, full artists' statements and more, see  
<https://www.rchs.com/news/chamber-art/>**

